

# BUUG-YARAHHA DUGSIYADA THEME



## Fasalada: Dugsiga barbaarinta illaa Sideedaad

### SY 2021 - 2022 DIIWAANGELINTA FURAN

Janaayo 7, 2021 - Febraayo 5, 2021

**Ka codso onleenka:**

<http://www.yourchoicedekalb.org>

### Warbixinta Barnaamijka Dooqa Dugsiga:

<http://www.dekalbschoolsga.org/school-choice>

Diiwaangelinta Furan ee Dooqa  
Dugsiga

Goobta Caawinta:



1192 Clarendon Avenue,  
Avondale Estates, GA 30002

Janaayo 7, 2021 - Febraayo 5, 2021

9:00 a.m. - 4:00 p.m.

*\*\*Caawinta waji ka wajiga Taariiqaha  
isku badeli karo sida waafaqsan  
cabirada cudurka safmarka hadeer.*

~~~~~  
*Diiwaangelinta Dambe ee Dooqa  
Dugsiga:*



### Dugsiyada Hoose

- Edward L. Bouie, Sr.
- Marbut
- Narvie J. Harris
- Oakcliff
- Robert Shaw
- Wynbrooke

### Dugsiga Dhexe

- Horyaalka Dugsiga

**Natijoooyinka Lootada La soo daayay: Maarso 26, 2021 @ 5:00 p.m**

# Warbixinta Dugsiyada Theme

| <b>Dugsiga Theme</b>                                               | <b>Ciwaanka</b>                                                 | <b>Saacadaha Dugsiga</b>      | <b>Taariiqaha Dalxiiska iyo Waqtiyada</b>                                         | <b>Dugsiyada Theme Feeder</b>                                         |
|--------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------------------------------|-------------------------------|-----------------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------------------------------------|
| <b>Edward L. Bouie Sr. Elementary School</b><br>Fasalada: PreK - 5 | 5100 Rock Springs Road<br>Lithonia, GA 30038<br>(678) 676-8202  | 07:45 a.m.<br>-<br>02:15 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Browns Mill ES<br>Fairington ES<br>Flat Rock ES<br>Murphey Candler ES |
| <b>Dugsiga Hoose Narvie J. Harris</b><br>Fasalada: PreK - 5        | 3981 McGill Drive<br>Decatur, GA 30034<br>(678) 676-9202        | 07:50 a.m.<br>-<br>02:15 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Chapel Hill ES<br>Cedar Grove ES<br>Oak View ES                       |
| <b>Marbut Elementary School</b><br>Fasalada: PreK - 5              | 5776 Wadada Marbut<br>Lithonia, GA 30058<br>(678) 676-8802      | 07:30 a.m.<br>-<br>02:05 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Panola Way ES<br>Stoneview ES<br>Woodridge ES                         |
| <b>Dugsiga Hoose Oakcliff</b><br>Fasalada: PreK - 5                | 3150 Willow Oak Way<br>Doraville, GA 30340<br>(678) 676-3102    | 07:45 a.m.<br>-<br>02:15 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Cary Reynolds ES<br>Doraville United ES<br>Hightower ES               |
| <b>Dugsiga Hoose Robert Shaw</b><br>Fasalada: PreK - 5             | 385 Wadada Glendale<br>Scottdale, GA 30079<br>(678) 576-6002    | 07:45 a.m.<br>-<br>02:15 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Allgood ES<br>Dunaire ES<br>Indian Creek ES<br>Jolly ES<br>Rowland ES |
| <b>Dugsiga Hoose Wynbrooke</b><br>Fasalada: PreK - 5               | 440 Wicksbury Way<br>Stone Mountain, GA 30087<br>(678) 676-5002 | 07:45 a.m.<br>-<br>02:15 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Pine Ridge ES<br>Princeton ES<br>Rock Chapel ES<br>Shadow Rock ES     |
| <b>Dugsiga Dhexe Champion</b><br>Fasalada: 6 - 8                   | 5265 Mimosa Drive<br>Stone Mountain. GA 30087<br>(678) 875-1502 | 08:50 a.m.<br>-<br>03:50 p.m. | Dalxiisyada Fogaanta TBA<br>Fiiri Websaydka Dugsiga ee loogu tallogalay aqbaaraha | Dhammaan Dugsiyada<br>Dhexe DeKalb                                    |

### **Taariiqda Traditional Theme School**

Barnaamijka dhaqanka dugsiga theme ee Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb wuxuu bilowday 1996 oo wuxuu bixiyaa dooqa dugsiga ee loogu talloagalay waaladiinta iyo ardayda ee aan lagu xadeyn bandhiga waxbarashada hore.

Barnaamijkaan wuxuu ku saleysanyahay filashooyinka sare, ka qeybgalka waalidka iyo xiisaha lagu dabogalayo waaya aragnimada waxbarashada adag. Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb wuxuu leeyahay todoba dugsiyada dhaqanka theme oo ay ku jiraan Edward L. Bouie, Sr., Marbut, Narvie J. Harris, Oakcliff, Robert Shaw, Wynbrooke Traditional Theme Elementary Schools, iyo Champion Traditional Theme Middle School oo ku yaalo aagag kala duwan ee Gobalka DeKalb, Georgia.

### **Qeybaha Taariiqda Traditional Theme School**

Dugsiga dhaqanka theme waa dugsi ku yaalo bulshada gudaheeda oo ka soo jiita ardayda dugsiga hoose dugsiyada dariska ah ama heerka dugsiga dhexe ka bilow illaa dugsiga degmada sababtoo ah qaababka gaarka ah ee loo naqshadeeyay inay buuxiso baahiyada ardayda iyo waaladiinta. Mowduuca dhaqanka dugsiga waxaa loo naqshadeeyay in ay siiso ardayda barnaamij dhameystiran, waxbarasho maadooyin kala duwan ee goobta sida sareyso loogu qaabeeyay. Ardayda waa ka qeybqaatayaal firfircoon ee tartanka barnaamijka oo ku jiro mashruucyada barashada guriga iyo qaarista luuqada aduunka. Qaabka waxbarashada wareega guud waxay u hogaamisaa shaqooyinka aad ugu qaabeysan cilmi baaris iyo mashruuca caawinta gacanta oo u baahan xalinta dhibaataada iyo fikirka adag. Waaladiinta waa qeyb muhiim ah ayay ka yihiin barnaamijka sida ay uga shaqeeyaan in ay xoojiyaan barnaamijka barashada iyo si loo siiyo taageero dugsiga.

### **Dugsiyada Feeder ee Traditional Elementary Theme School**

Dugsiyada hoose theme ee dhaqanka inta badan waxay qaabilaan ardayda ka socdo dugsiyada boosaska aan laheyn. Dugsiyada hoose ee bulshada u dhow ee qaba baahida ugu weyn oo xalinta ah waxay u adeegayaan dugsiyada feeder ee dugsiyada hoose ee theme. Haddii diiwaangelinta dugsiga feeder hoos u dhacdo, dugsiga feeder marka uma adeegayo sida goobta theme feeder. Go'aamintaan waxaa la sameeyaa sannad walba. Dugsiga dhexe theme waxay ka helaan ardayda dhinaca Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb.

### **Qaababka gaar ah ee Dugsiga Traditional Theme**

- Loo baahanyahay ka qeybgalka waalidka
- Xoog saarista maadooyinka muhiimka ah
- Heerarka waxbarashada sareeyo
- Gaarista luuqada aduunka
- Xeerka anshaxa adag
- Loo baahanyahay xeerka labiska/adag
- Xoog saarista fikirka adag iyo xalinta dhibaataada
- Barnaamijka aqrinta tooska ah (Dugsiyada Hoose)
- Loo baahanyahay aqrinta kuleelaha iyo howlaha xisaabaha
- Loo baahanyahay tartanka shaqada joogtada ah
- Barnaamijyada meerinta
- Howsha ku saleysan barashada
- Qorsheeyayaasha ajendaha
- Barashada Maadooyinka Badan

### **Jaheynada Dugsiga Traditional Theme**

- Waaladiinta iyo ardayda waxaa laga filanayaa inay helaan diiwaangelin hal sanno ah
- Markii la ogolaado, ardayda waa inay ka qeybgalaan maalinta ugu horeyso ee dugsiga si ay u joogteeyaan meeleyniisa/meeleyniinta
- Waaladiinta waa inay dhameystiraan saacadaha adeega ka qeybgalka waalidnimada oo ardayda ka diiwaangashan dugsiga theme. Haddii walaalaha ka diiwaangashanyihiin dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe ee theme si isku mar ah, waalidka wa inuu dhameystiraa boqolkiiba 50% ee saacadaha adeega ka qeybgalka waalidka oo dugs walba si aad u heshid buundada saacadaha adeega ka qeybgalka waalidka
- Ardayda waa inay xirtaan labiska loogu talloagalay ee dugsiga theme ee ka diiwaangashantahay
- Diiwaangelinta joogtada ah waa suurto gal markii loo hogaansamo sharciyada dugsiga theme iyo sharuudaha oo ay ku jiraan dhameystirka saacadaha adeega ka qeybgalka waalidka iyo ka qeybgalka ardayga
- U dhameystiro dhammaan shaqooyinka shaqada dugsiga sida wanaagsan ee awoodiisa/awoodeeda ah
- Uga qeybgalo dugsiga si joogta ah oo imow waqtigeeda. Ka fogaado bixitaanka xad dhaafka
- Uga tago xarunta si joogta ah dhammaadka maalinta dugsiga ama ka qeybqaadashada howsha dugsiga la ogolyahay.
- Ku dhaqmo nafsadiisa/nafsadeeda qaab ku haboon dugsiga
- Ardayda hadeer ka diiwaangashan oo haysto heer wanaagsan way sii wadan karaan ka qeybqaadashada Barnaamijka Dugsiga Theme
- Markii meeleyniga dugsiga theme la diido ama aan la xareyn taariiqda diiwaangelinta loo xilsaaray, ardayga waa inuu dib u codsadaa dugsiga theme inta lagu jiro muddada diiwaangelinta xigto

**Haddiiba jaheynadaan la joogteeyay ardayga wuxuu ku raaxaysanayaa waaya aragnimo dugsi guul ah. Dhacdada sharuudahaan aan la buuxin, ardayga waxaa looga baahanayaa inuu ka qeybgalo dugsiga aaga ka qeybgalka gurigiisa/gurigea.**

### **Dulmarka Nidaamka Doorashada**

Codsadaha dugsiga dhaqanka theme waxaa lagu dooranayaa dhinaca nidaamka doorashada tooska ah. Haddii ay jiraan codsadyaal ka badan kuraasta la heli karo, ardaydaas aan la dooran waxaa lagelinayaa liiska sugitaanka. Haddii ay jiraan codsadyaal ka yar kuraasta la heli karo, Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb wuxuu qiranayaa dhammaan codsadyaasha u qalma dugsiga theme. Xaaladaan, codsiyada la gudbiyay dhammaadka waqtiga waxaa looga baarandagayaa tixgelinta. Codsadyaasha la doortay iyo liiska lagu qoray waxay helayaan ogeysiin kadib markii ay nidaamka doorashada tooska ah la dhameystiro.

### **U qalmida lagu Codsanayo Dugsiga Theme**

- Dhammaan ardayda DeKalb, ee hadeer, gaarka ah iyo ardayda dugsiga guriga, oo iska diiwaangelinayo prekindergarten oo illaa fasalada shannaad oo dagan aagaga ka qeybgalka dugsiga theme feeder ee la aqoonsaday, waxay u qalmaan inay ka qeybqaataan baqtiyaanasiibka oo aad codsataid diiwaangelinta dugsiyada hoose ee dhaqanka theme ee loo xilsaaray. Waa inay ku dhameystiraan oo ku gudbiyaan Dooqa Dugsiga codsiga onleenka ka hor dhammaadka codsiga.
- Dhammaan ardayda DeKalb, ee hadeer, gaarka ah iyo ardayda dugsiga guriga ee iska diiwaangelinayo fasalada 6, 7, iyo 8 oo dagan Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb wuxuu codsan karaa iska diiwaangelinta dugsiga dhexe ee dhaqanka theme. Waa inay ku dhameystiraan oo ku gudbiyaan Dooqa Dugsiga codsiga onleenka ka hor dhammaadka codsiga.
- Walaalaha ardayda ka diiwaangashan dugsiga theme waxay u qalmayaan nidaamka doorashada haddii waaladiinta dhameystiraan codsiga dugsiga theme ee ardayda inta lagu jiro kulanka diiwaangelinta furan. Iyo haddii ardayga u qalmo inuu iska diiwaangeliyo dugsiga theme ee loo xilsaaray.
- Markii dugsiga uusan markale aheyn dugsiga feeder, ardayda cusub ee ka socota dugsiga feeder lagama diiwaangelinayo: si kastaba, walaalaha ardayda soo laabaneyso waxay codsan karaan inay iska diiwaangeliyaan dugsiga theme ee loo xilsaaray.

### **Saadaha Dugsiga iyo Saadaha Dugsiga**

Waqtiga howlgalka iyo kaleendarka dugsiga ee dugsiyada dhaqanka theme guud ahaan waa isku midka sida kuwa nidaamka dugsiga. Barnaamijyada maalinta iqtiyaarka la kordhiyay, howlaha, iyo waxbarashooyinka waa la heli karaa.

### **Gaadiidka**

Xeerka gaadiidka haddeer ee Gobolka DeKalb waxaa raacayo. Waaladiinta, fadlan ogow in gaadiidka dugsiga hoose ee mowduuca wuxuu sii joogteynayaa in uu ku siiyo sida qaabeysnaanta hadeer. Ardayda Dugsiga hoose ee mowduuca waxay joogteynayaan in ay helaan gaadiidka ka imaanaya xaafada ee usocda dugsiyada mowduuca loo xilsaaray. Gaadiidka u socda Dugsiga Dhexe Champion wuxuu u joogteynayaa sida qaabeysnaanta hadeer. Inta lagu jiro sannadka hadeer ee dugsiga, ardayda dugsiga dhexe waxay soo wargelinayaan aaga qaadista ay doorteen oo gaadiidka u socdo Dugsiga Dhexe Champion.

### **Walaalaha Ardayda Dugsiga Theme**

Walaalaha ardayda hadeer ka diiwaangashan kaliya fasalada prekindergarten illaa 4, 6 iyo 7 waxaa laga siin karaa diiwaangelin isla dugsiga haddii waaladiinta ay codsadaan diiwaangelin oo kuraasna la heli karo. Haddii meeleynta walaalaha aysan suurtoagal aheyn, walaal walba waxaa lagu meeleynayaa liiska sugitaanka oo qaabka ardayga lagu doortay intii lagu jiray baqtiyaanasiibka. **Fadlan ogow in bixintaan AYSAN QUSEYN codsadyaasha prekindergarten ama codsadaha walaalaha hadeer ka diiwaangashan fasalada 5 iyo 8 ama codsadyaasha dambe.**

Walaalaha codsanayo isla dugsiga iyo heerka fasalka, oo wadaago isla taariiqda dhalashada waxaa loo tixgelinayaa sida meeleynta ku dhaceeyso dooqa waalidka/masuulka haddii hal walaal la doorto oo kuraas la heli karo. Waa masuuliyada waalidka/masuulka in la tilmaamo "Walaalo hadeer codsanayo dugsiga theme" ee codsiga oo buuxi warbixinta laga codsaday walaal walba.

**Haddii lagu guuldareysto inay tilmaanto nooc walba ee heerka walaalaha ee codsiga way ka saarayaan bixintaan noocyo walba ee walaalaha codsanayo diiwaangelinta. Walaalaha waxaa lagu meeleynayaa baqtiyaanasiibka sida arday kali ah ee codsanayo diiwaangelinta. Si aad u heshid mudnaanta walaalaha, isla waalidka waa inuu u buuxiyaa codsi gaar ah walaalaha oo dhan oo masuuliyada isla waalidka ah.**

Ujeedooyinka bixintaan "walaalaha" waxaa ku jiro xubinta qoyska oo dagan isla qoyska ee waalidka/waaladiinta loogu magacaabay masuulka sharciga ah. Waraaqaha sharciga waa in la bixiyaa.

### **Carruurta Shaqaalaha Waqtiga Buuxo**

Bixinada xiggo waxay quseysaa kaliya canuga walidkiisa haynta ama masuulka sharciga uu yahay shaqaale waqti buuxo ee Degmada. Bixinadaan ma quseyso barnaamijyada pre-K.

Sida quseyso sadarada 3 iyo 4 hoose ee la xiriirto dugsiyada theme iyo barnaamijyada magnet, canuga ee waalidkiisa illaaliyaha ama masuulka sharciga waa shaqaalaha waqtiga buuxo ee Degmada waa loo ogolaanayaa ka qeybgalka dugsi ee waalidka ama masuulka sharciga ka shaqeynayo; ama haddii leeyahay Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiyaadka ("IEP"), ee dugsiya Degmada oo si ku haboon u fullin karto IEP-ga canuga. Xafiiska Shaqada Ardayga waa in la ogeysiiyaa ka hor inta canuga laga diiwaangelin. Gaadiidka laguma bixinayo Lacag bixinta Degmada ee waxbarashada loogama baahanayo xittaa haddii shaqaalaha iyo canuga daganyihiin degmo dugsi kale. Dooqaan waxaa loo heli karaa kaliya shaqaalaha dugsi ku saleysan.

Sida quseyso sadarada 3 iyo 4 hoose ee la xiriirto dugsiyada theme iyo barnaamijyada magnet, canuga ee waalidkiisa illaaliyaha ama masuulka sharciga waa shaqaalaha waqtiga buuxo ee Degmada waxaa loo ogolaanayaa ka qeybgalka dugsi kale ee naqshada fasalada isku xiggo ee dugsi ee waalidka ama masuulka sharciga ka shaqeynayo; ama haddii leeyahay IEP, ee dugsiya Degmada oo si ku haboon u fullin karto IEP-ga canuga. Shaqaalaha xafiiska dhexe way ka qeybgeli karaan dugsiyada naqshada quudinta ee ku yaalo baqshada qaabka fasalada isku xiggo ee goobta shaqada shaqaalaha. Shaqaalaha rajeynayo inay ku isticmaalaan nafsadooda fursada lagu qeexay sadarka waxay ogeysiineysaa Xafiiska Shaqada Ardayga ee sida waafaqsan jadwalka waqtiga ee la ansixiyay uuna daabacay Kormeeraha guud taas oo si maacqul u sheegto sharudaha qorsheynta Degmada iyo dugsiyada gaarka ah; si dheeraad ah, loogu sheegay, in jadwalka noocaas ee shaqada qaabilayo shaqaale cusub oo dhaqanka taariiqdooda kireysiga ay u hogaansanaaneyso jadwalka waqtiga ee noocaas oo si dheeraad ah loogu sheegay, in sannadka fullinta jadwalka waqtiga noocaas waxaa lagu saxayaa, illaa iyo xad sida muhiimka ah ee taariiqda marinka xeerkaan, si ay u qaabisho dhammaan shaqaalaha hadeer ee u qalma oo sannad dugsiyeedka 2021-22. Gaadiidka ma bixineyso Degmada. Lacag bixinta waxbarashada loogama baahanayo xittaa haddii shaqaalaha iyo canuga daganyihiin degmo dugsi kale. Ardayda loogu ogolaaday halkaan inay ka qeybgalaan dugsi feeder pattern waa in u hogaansamaan dugsi iyo heerarka dhaqamada ay ansixiyeen Degmada, ka qeybgalka, iyo waqtiga ilaali si markaas loogu ogolaado in uu diiwaangshnaado.

Carruurta raadineyso inay ka qeybgalaan dugsiya theme sida waafaqsan qodobka waa inay galaan baqtiyaanasiibka oo ay u hogaansamaan dhammaan nidaamyada kale ee ogolaanshaha ee quseeyo dugsiyaas. Gaadiidka ma bixineyso Degmada. Lacag bixinta waxbarashada loogama baahanayo xittaa haddii shaqaalaha iyo canuga daganyihiin degmo dugsi kale.

### **Nidaamka Codsiga Dugsiga Theme**

Buuxi codsiga onleenka ee <http://yourchoicedekalb.org> iyada oo la isticmaalayo kumbuyuutar, kumbuyuutarka maktabada deegaanka ama iyada oo laga codsanayo onleenka ee **Xafiiska Barnaamijyada Dooqa Dugsiga**.

Waa masuuliyada waalidka/masuulka sharciga inay gudbiyaan/xareeyaan koobiyada dhammaan dokumintiyada **iyoo codsiga** si loo dhameystiro codsiga (cadeynta daganaanshaha, shahaadada dhalashada, kaarka wargelinta, iwm.) oo waqtiga ugu dambeeyo ah. Codsigaaga **LOOMA** tixgelin si dhameystiran illaa dhammaan waraaqaha taageerayo loo gudbiyo Xafiiska Dooqa Dugsiga xilga dhammadka waqtiga. **Dhammaan waraaqaha waxay noqdeen hantida Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb.**

Codsadaha aan ka diiwaangashaneyn Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb waa inay bixiyaan cadeynta daganaanshaha (gaaska hadeer, korontada, biilasha biyaha, qoraalka deynta guriga ama heshiisyada kirada ee ku qoran magaca waalidka ama masuulka sharciga ah). **Biilasha taleefonka, bayaanka bangiga, biilashada fiilada, iwm. Looma ogolaanayo sida cadeynta daganaanshaha.**

Dhammaan codsadaaasha aan ka diiwaangashaneyn Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb oo ku codsanayo prekindergarten fasaladiisa ugu horeeyo waa inuu bixiyaa koobi la cadeeyay ee shahaadada dhalshada si loo dhameystiro nidaamka codsiga.

Codsadaaasha aan ka diiwaangashaneyn Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb oo hadeer ku jiro fasalada 1 - 7waa inay bixiyaan koobiga kaarka wargelinta hadeer si loo dhameystiro nidaamka codsiga.

### **Nidaamka Doorashada Baqtiyaanasiibka Tooska ah**

Codsadaaasha Dugsiga Theme waxaa lagu xulunayaa dhinaca nidaamka xulashada tooska ah ee Maamulka Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb iyo Dhismaha Waxbarashada haddii tirada codsiyada dhaafaan dUGSiyada feeder' tirada la saadaaliyay ee kuraasta loo heli karo heerar walba ama dhammaan fasalada ee dugsiya theme. Codsadaaasha aan loo dooran diiwaangelinta waxaa loo dooranayaa liiska sugitaanka illaa codsadaaasha oo dhan la meeleeeyo. **Dhacdada in nidaamka doorashada tooska ah ee cilad la'aanta, nidaamka doorashada tooska ah dib ayaa loo sameynayaa iyo doorashada koowaad ama tirada liiska sugitaankawaxay isbadeli kartaa markii aad sameyneysid nidaamka doorasho cusub.**

## Qeybinta Kuraasta

### Dugsiyada Hoose Theme

Sannad dugsiyeed walba tirada guud ee kuraasta ee dugsi walboo theme, oo heerka fasalkiiba waxaa la go'aansadaa ka hor baqtiyaanasiibka.

Sida ku saleysan Xeerka Guddiga JBCC, carruurta ku jirto fasalada K - 5 ee shaqaalaha waqtiga buuxo ee dugsiya ku saleysan waxaa lagu meeleynayaa markii kuraas la heli karo. Haddii kuraasta aan loo heli karin dhammaan carruurta shaqaalaha, codsadhaha liiska sugitaanka ayaa la gelinayaa.

Tirada kuraasta loo heli karo dugsi walboo hoose ee theme waxaa loo qeybiyaa dugsiyada feeder sida ku saleysan dugsiyada leh baahida weyn ee xalinta sabab la xiriirto boos la'aanta ama diiwaangelin weyn. Waxaa jiro qeybood ee ardayda lagu meeleynayo inta lagu jiro wareegtada nidaamka doorashada baqtiyaanasiibka oo ay ku jiraan Walaalaha Shaqaalaha Theme, iyo At-Large. Codsade walba oo aan heleyn meeleyn liiska sugitaanka ayaa la gelinayaa si markaas ee mida loo doortay inta lagu jiro wareegtada nidaamka doorashada baqtiyaanasiibka. Jaheynada xulushadaan ma quseeyaan barnaamijka Dugsiga barbaarinta.

### Dugsiga Dhexe Theme

Sannad dugsiyeed walba tirada guud ee kuraasta, oo heerka fasalkiiba waxaa la go'aansadaa ka hor baqtiyaanasiibka.

Sida ku saleysan Xeerka Guddiga JBCC, carruurta ku jirto fasalada 6 - 8 ee shaqaalaha waqtiga buuxo ee dugsiga ku saleysan waxaa lagu meeleynayaa markii kuraas la heli karo. Haddii kuraasta aan loo heli karin dhammaan carruurta shaqaalaha, codsadhaha liiska sugitaanka ayaa la gelinayaa.

Bulshada dugsiga hoose walba ee theme waxaa loo qoondeynayaa boqolkiiba in simman ee kuraasta fasalka lixaad ee la heli karo si loo aasaaso boqolkiiba 50% ee bulshada guud ee fasalka lixaad ee dugsiga dhexe theme. Codsadayaasha fasalka lixaad ee balaaran waxay buuxinayaan barka kale ee kuraasta la heli karo ee aagaga ka qeybgalka dugsiga dhede ee gurigooda. Boqolkiiba 50%-50% qeybinta waxaa loo isticmaalay si ay ugu ogolaato codsadayaasha fasalka todobaad iyo sideedaad dooqa lagu buuxinayo kuraasta la heli karo ee aagooda ka qeybgalka dugsiga dhexe. Codsadayaasha fasalka todoba iyo sideed ee balaaran waxay buuxinayaan barka kale ee kuraasta la heli karo ee aagaga ka qeybgalka dugsiga dhede ee gurigooda. Waxaa jiro afar qeybood ee ardayda lagu meeleynayo inta lagu jiro nidaamka doorashada baqtiyaanasiibka oo ay ku jiraan shaqaalaha theme, walaalaha ardayda hadeer diiwaangashan ee theme, ardayda hore ee theme iyo codsadayaasha guud. Dugsiyadda theme ee la heli karo iyo furitaanada balaaran waxaa loo qeybiyaa kuwa ka qeybqaadanayo dfugsiyada dhexe. Haddii kuraas aan la filaneyn banaanaato; kuraasta hartay waxaa loo qeybinayaa aagaga ku saleysan baahida ugu weyn ee xalintaada sabab la xiriirto xadidnaanta booska ama diiwaangelinta ugu weyn. Nidaamka xulashada/baqtiyaanasiibka wareegtada tooska ah waa la sameynayaa haddii tirada codsiyada dhaafto tirada ay saadaaliyeen dugsiga feeder ee kuraasta la heli karo ama dhammaan heerarka fasalada ee dugsiga theme.

### Liiska sugitaanka

Markii kuraasta oo dhan la buuxiyo, codsadayaasha haray aan loo dooran meeleynta inta lagu jiro nidaamka doorashada tooska ah waxaa lagu meeleynayaa liiska sugitaanka oo qaabka oo codsadhaha dhamaadaan inta lagu jiro nidaamka doorashada tooska ah. Haddii kuraas dheeraad ah la heli karo kadib markii baqtiyaanasiibka la sameeyo, kuraasta waxaa lagu buuxinayaa codsadhaha ee ku jiro liiska loogu talloagalay (fasalkiiba, oo dugsiga feeder). Liiska sugitaanka way quseyneysaa ka bilow taariiqda dugsiyada theme bilaabeen nidaamka xuluashada/baqtiyaanasiibka wareegtada illaa **Agoosto 31, 2021**. Liiska sugitaanka waxaa lagu qaabilayaa xafiiska Barnaamijyada Dooqa Dugsiga. Ardayda laguma meeleynayo illaa kadib **Agoosto 31, 2021**. **Si kastaba, codsadayaasha dugsiga barbaarinta ee ku jiro liiska sugitaanka waxaa lagu meeleynayaa illaa sannadka dugsiga sida kuraasta loo heli karo ee jaheynada gobolka ee la xiriiro Barnaamijka DugSlga barbaarinta Georgia.**

### Nidaamka Ogeysiinta

Ogeysiinta waxaa loo dirayaa codsadayaasha lagu doortay baqtiyaanasiibka dugsiga theme. Ogeysiintaan waxay ogeysiineysaa waaladiinta nidaamyada u baahan in lagu dhameystiro doorashada. Haddii sabab walba waaladiinta/masuulada ku guulsareystaan inay dhameystiraan nidaamka diiwaangelinta, magaca macmiilka waa laga saarayaa liiska fasalka. Jaheynada xiggo waxay quseynayaan dhammaan ardayda loo doortay inay ka qeybgalaan Barnaamijka Dooqa Dugsiga.

- ⇒ Haddii ardayga uusan buuxin sharuudaha dalacsiinta ee la iskaga diiwaangelinayo heerka fasalka oo codsadhaha loo xushay, meeleynta ardayga waa la diidayaa. Kursiga waxaa lagu bixinayaa codsiga u qalma ee ku xigga ee ku jiro liiska sugitaanka.
- ⇒ Ardayda waa inay ku jirtaa ka qeybgalka dugsiga theme ee loogu talloagalay maalinta koowaad ee dugsiga si u haysto meeleyn. Kuraasta banaan waxaa lagu buuxinayaa liiska sugitaanka.
- ⇒ Lama ogolo arday cusub ee loo ogolaanayo kadib **Agoosto 31, 2021**. Ardayda aan lagu dooran dib ayay u codsan karaan sannad dugsiyeedka 2020 - 2021. **Codsadayaasha dugsiga barbaarinta ee ku jiro liiska sugitaanka waxaa lagu meeleynayaa illaa sannadka sida kuraasta loo heli karo ee jaheynada gobolka ee la xiriiro Barnaamijka DugSlga barbaarinta Georgia.** Ardayda liiska sugitaanka waxay helayaan ogeysiinta ay ku jiraan lamvbarka liiskooda sugitaanka ee waqtiga **2021 - 2022** nidaamka doorashada baqtiyaanasiibka wareegtada tooska ah. Codsadayaasha onleenka waxay eegi karaan heerka liiskooda sugitaanka iyaga oo ka galayo Barnaamijyada Dooqa Dugsiga akoonka onleenka.
- ⇒ Codsadayaasha la doortay waa inay ogolaadaan ama diidaan meeleynta lagu siiyay barnaamijka oo dhammaadka waqtiga barnaamijka ah.

# DIGNIINTA

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) wuxuu leeyahay xaquuqdaa lagu badelayo qoraal walba ee daabacidaan ee la xiriira, laakin aan ka xadidneyn, sharciyada, xeerarka, nidaamyada, tilmaamaha barnaamijka, taariiqaha, manhajka, iyo koorsooyinka iyada oo aan jirin ogeysiin hore ama waajibaad.

DCSD waxay leedahay xaquuqda loogu bedelayo ardayga barnaamijka dooq walboo dugsi ah sabab la xiriirto xaalado aan la arkin.

Haddii aad ku guuldareysto in aad aqriso warqadaan ma siineyso cudur daar waalidka iyo ardayda oo xeerarka iyo sharuudaha lagu qeexay halkaan.

Waa xeerka Guddiga Waxbarashada Gobalka DeKalb ma ahan in la midib takooro iyadoo ku saleysan da, jinsi, midib, diin, dhalashada wadan, galmada, qomiyada, midibka, diinta, asalka dhalashada, curyaamiinta ama naafonimada ee ku jirta barnaamijyadeeda waxbarashada, ama dhaqamada shaqada.

